

Baarista kansarka mindhicirka weyn iyadoo la adeegsanayo baaritaanka Cologuard®

Baaritaanka Cologuard waxaa daboolaya Medicare iyo badi shirkadaha caymiska ee waaweyn.

\$0 Bukaanka badankooda caymiska ku jira waxay bixiyaan **\$0** baaritaanka Cologuard^{1*}

96% Guud ahaan waddanka, in ka badan **96%** bukaanada adeegsada Cologuard jeebkooda kama bixiyaan lacag loogu talagalay baaritaanka^{1*}









Wax badan ka baro Cologuard.com/insurance ama wac **1-844-870-8870**. Waxaan kaa caawin karnaa inaad shirkadda caymiskaaga weydiiso su'aalaha saxda ah.

Caymisyada badankoodu waxay daboolaan baaritaanka kolonoskopiga ee dabagalka ah ka dib marka baaritaanka Cologuard uu noqdo mid togan.^{2,3†}



Baaritaanka Cologuard waa mid ay fududahay in guriga lagu isticmaalo

Tilmaamo Faahfaahsan oo Dhammaystiran ayaa ku jira Sanduuqa Cologuard Cologuard.com/use

- 1 FADHIISO**

 - Isticmaal baaritaanka Cologuard marka aad diyaar tahay.
 - Weelkaaga cad ee muunadda dul saar musqusha.
 - Ku fadhiiso musqusha.
- 2 SOO XOOQ/ QAAD**

 - Ku saxaroo weelka cad ee muunadda.
 - Saxaradaada (xaarka) ku soo qaad ul oo dib ugu rid tuubbada xirmada.
- 3 QOY & XIR**

 - Weelka muunadda ka buuxi dareeraha ilaalinta.
 - Xir weelka weyn iyadoo ay gudaha muunadaadu ku jirto.
- 4 CALAAMA-DEE & DIR**

 - Buuxi labada calaamadood.
 - Xirmadan/aaladan ku soo celi Exact Sciences adigoo adeegsanaya UPS®.



Soo celi muunadaada adigoo bixinayn wax kharash ah


- Qaadista UPS ka jadwaleyso barta Cologuard.com/UPS ama wac **1-844-870-8870**
- Xirmadaada u gee UPS. Dukaamada maxalliga ah iyo saacadaha geynta ka hel Cologuard.com/UPS

*Qiyaasta dhawayd Exact Sciences waxay ku salaysan tahay lacagaha ay bixiyeen bukaanadu.

†Bukaanada badankooda, tani waxay dhaqan geli doontaa Janaayo 1, 2023, mana khusayso qorshayaasha ganacsi ee leh ka-dhaaftaanka.^{2,3}

Natijoooyinka baaritaankaaga Cologuard®

Bixiyahaaga daryeelka caafimaadka waa inuu helaa natijoooyinkaaga qiyaastii 8-10 maalmood ka dib marka Exact Sciences ay hesho muunadaada.



Baaritaanka Cologuard wuxuu **DNA isbeddelay** iyo **dhiig** (calaamadaha kansarka) ka eegaa saxaradaada⁴

- Natijoo taban waxay ka dhigan tahay in baaritaanka Cologuard uaan lagu arkin calaamado ay suurtagal tahay inay muujinayaan kansar. Waxay u badan tahay inaad qabin kansarka mindhicirka weyn.⁴
- + Natijada togan waxay ka dhigan tahay in baaritaanka Cologuard lagu arkay calaamado ay suurtagal tahay inay muujinayaan kansar. Natijada togan **macnaheedu maaha** inaad qabto kansar.⁴ Ballan dabagal ah ka qabso bixiyahaaga daryeelka caafimaadka.

Dadka qaarkood waxay helaan natijoooyin been abuur ah (aan sax ahayn) oo muujinayo cudurka (togan) ama aan muujinayn cudurka (taban).

Had iyo jeer weydii bixiyahaaga daryeelka caafimaadka tallaabooyinka xiga ee baaritaanka.⁴

Macluumaad dheeraad ah iyo muuqaalo ka hel:
Cologuard.com/UnderstandingResults

Caddaymo iyo Macluumaad Muhiim ah oo ku Saabsan Khatarta

Baaritaanada Cologuard® iyo Cologuard Plus® waxaa loogu talagalay in lagu baaro dadka da'doodu tahay 45 sano ama intaas ka weyn kuwaas oo khatar dhexdhexaad ah ugu jira kansarka mindhicirka weyn iyo malawadka iyadoo lagu ogaanayo calaamado DNA ah iyo dhiig ku jira saxarada. Ha isticmaalin badeecooyinka Cologuard haddii aad taariikh shakhsiyeed u leedahay kansarka mindhicirka weyn iyo malawadka ah ama aad qabto burooyin kansar noqon kara, aad qabto cudurka hurgumka mindhicirka, aad taariikh qoyseed u leedahay kansarka mindhicirka weyn iyo malawadka, ama aad qabto cilladaha qaar ee kala dhaxlo, ama natijoo togan oo ka timid hab kale oo ah baaritaanka kansarka mindhicirka weyn oo la sameeyay intii lagu gudajiray muddada uu baaritaankaas ku taliyay. La hadal bixiyahaaga daryeelka caafimaadka haddii wax ka mid ah xaaladahan ay ku khuseeyaan.

Waa in si taxaddar leh loo akhriyaa natijoooyinka Cologuard. Haddii natijadu ay sheegto in wax la arkay (positive) ma'ahan macnaheedu in qofku uu kansar qabo. Bukaanka ay natijadoodu wax ku sheegto waa in loo diraa kolonoskobi (colonoscopy). Haddii natijadu aysan wax cudur ah sheegin (negative), taas macnaheedu ma ahan in qofku uusan kansar qabin. Bukaannada baaritaankooda aan waxba laga helin waa in ay natijadaas dhakhtarkooda kala hadlaan goorta ay tahay in markale la baaro. Way dhici kartaa in natijadu noqoto mid cudur sheegta oo haddana been ah, iyo mid cudur aan sheegin oo haddana been ah. Waa inuu dhaqtar kuusoo qoraa.

Tixraacyada: 1. Internal Data on File. Exact Sciences. 2. FAQs about Affordable Care Act Implementation Part 51, Families First Coronavirus Response Act and Coronavirus Aid, Relief, and Economic Security Act Implementation. US Department of Health & Human Services. Published January 10, 2022. Accessed March 30, 2026. <https://www.hhs.gov/guidance/document/faqs-about-affordable-care-act-implementation-part-51>. 3. CMS. Calendar year (CY) 2023 Medicare physician fee schedule final rule. Published November 1, 2022. Accessed March 30, 2026. <https://www.cms.gov/newsroom/fact-sheets/calendar-year-cy-2023-medicare-physician-fee-schedule-final-rule>. 4. Exact Sciences. 2026. Cologuard Patient Brochure.